# Dacwada mideynta qoyska ee dadka heysta sharciga deganaanshaha magangelyada

**Waxaad heysataa shaci magangelyodoon iyo waxaad rabtaa inaad mideynta qoyska weydiisato**
Waxaa lagu siiyey sharci magangelyo oo muddo ah. Waxaad rabtaa inaad xubnaha reerkaaga ee dibada jooga in Nederlaan kuu imaadaan. Waxaad tahay kafaale qaade. Taasi waxey micnaheeda tahay in aad adigoo reerkaaga magacooda ku hadlaaya aad deganaansho mideynta qoyska aad u dalbeyso. Codsigan waa lacag la'aan.

Dacwada mideynta qoyska (dadka ka dib soo safraaya magangelyo) waxey ka kooban tahaylaba qeyb:

- Qeybta 1 waxey ku saabsan tahay codsiga 'wakiilasho degnaansho muddo ah (mvv)-dadka ka dib soo safraayo magangelyo'. Mvv waa fiiso muddo dheer lagu deganaado. Taasi ayaa reerkaaga ay Nederlaan ku imaan karaan.
- Qeybta 2aad waxay ku saabsan tahay nidaamka (magangalyada) ee gaaban kaddib marka xubnaha qoyskaagu ay yimaadaan dalka Nederlaan. Dadka reerkaaga waxaa la siinayaa sharrci magangelyo oo la dabaqay: sharcigooda wuxuu ku xiran yahay adiga sharcigaaga magangelyo.

Qoraalkan waxaad ka aqrin kartaa tallaabo ilaa tallaabo sida uu reerkaaga sarciga la dabaqay u hei karo.

## Ururadee ayaa la kulmeysaa?

Waxaad ka yar tahay 18 jir iyo waalid la'aan ama dad kale oo si rasmi ah kuu daryeela kulama socdaan Nederlaan. Haddana waa inuu sharciga Nederlaan inuu qof si rasmi ah kuu daryeelaa. Taasi waxaa loo yaqaanaa mas'uulka. Waxaa Nederlaan howshaasi ku howlan **Ururka Nidos** (stichting Nidos). Nidos ayaa dalbaneysa mas'uuliyadaada. Ururka Nidos ayaa qof ka mid ah shaqaalahooda ka dhigaaya daryeelaha dhalinta ee adiga kuu qaabilsan. Daryeelaha dhalinta ayaa kaa cawinaaya sida go'aanada muhiimka ah. Iyo ka shaqeynaaya inaad hesho meel fiican oo aad degto iyo kuu helaaya iskuul aad aado. Marka aad hesho deganaanshaha magangelyada ayaa caawiyaha dhalinta kaa sii caawini karaa dacwada mideynta qoyska. Nidos wax awood ah kuma laha go'aanka codsigaaga mideynta qoyska
www.nidos.nl

Waxaa **Xarunta Dhexe ee Dejinta Magangelyodoonka** (COA) ayaa dejinta iyo hagista u qaabilsan mudada dacwada maganglyodoonka ee magangelyodoonada Nederlaan. Tani sidoo kale wey quseysaa dadka dib ka imaanaaya ee Nederlaan iney imaadaan loo ogolaado. COA ayaa u abaabuleysa, cuntada iyo ceymis caafimaadka oo muddo ahhaddii loo baahdo. Waxaa kaloo COA kaa caawineysaa dhaqtar hadaad u baahan tahay xerada. COA waa uru madax banaan oo kama go'aamiyaan codsiyada mideynta qoyska.
www.coa.nl

**Ururka qaxootiga Caawiya Nederlaan** (VWN) waa urur madaxbanaan oo xaquuq insaanka u dooda oo waxaa loo sameeyey iney danaha magangelyodoonka. Shaqaalaha VluchtelingenWerk waxey ku siinayaan warbixin ku saabsan dacwada mideynta qoyska. Waxey kaa caawin karaan buuxinta foomka codsiga mideynta qoyska. Weyna ku hagayaan adiga iyo dadka reerkaaga dhamaan mudada dacwada mideynta qoyska uu socdo. Waxey kaloo kaa caawinayaan dhibaatada ururada kale. VluchtelingenWerk kama go'aamiyaan codsiyada mideynta qoyska.
www.vluchtelingenwerk.nl
www.refugeehelp.nl

**Daryeelka Caafimaadka Magangelyodoonka** (GZA) waa ururka ay xubnaha reerkaaga xerada jooga marka ay xanuunsadaan u tagayaan ama ahdey su'aalo caafimaad qabaan. Waxaa xerada COA dhexdeeda ama agagaarkeeda ku yaala xarunta caafimaadka GZA. GZA ayaa kuu sameynaaya ballamada caawisada dhaqtarka, kalkaalisada, la shaqeeyaha dhaqtarka GGZ ama dhaqtarka qoyska.
www.gzasielzoekers.nl

Immigratie- en Naturalisatiedienst
Ministerie van Justitie en Veiligheid

**Adeega immigreshanka iyo jinsiyada** (IND)Waa qeyb ka tirsan Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan. Waxaa IND go'aamineysaa in xubnaha reerkaaga ka soo baxayaan sharuudaha sharciga magangelyada. Shaqaalaha waxey baarayaan inaad dokumentiyadaada sax yihiin. Waxey kaloo sameyn karaan baaritaano dibada ah ayey bilaabi karaan. Tani waa baaritaano DNA iyo wareysiyo dadka reerkaaga. Waxaa IND ay adigana Nederlaan ayey su'aalo kugu weydiin karaan. Ka dib ayaa IND go'aamineysaa haddii ay reerkaaga Nederlaan imaan karaan.
www.ind.nl

INTERNATIONAL ORGANIZATION FOR MIGRATION
IOM·OIM
THE UNITED NATIONS MIGRATION AGENCY

**Ururka Caalamiga ee Muhaajiriinta** (IOM) waxey muhaajiriinta ka caawiyaan dunida oo dhan xafiisyo ku yaalo 100 wadan ka badan. Oo ay ka mid yihiin imaanshaha xubnaha reerka dadka sharciga magangelyada heysta. IOM waxey caawinaadan bixiyaan iyagoo lacag qaadanaaya sida adeega la talinta ama caawinaada safarka oo buuxa. Labadaba waa inaad websaaytkooda aad ka weydiisato xadaa qarashka. IOM wax caawino dhaqaale ma bixin karaan mideynta qoyska ah.
www.iom-nederland.nl

Ministerie van Buitenlandse Zaken

**Wasaarada Arrimaha Dibada** (BZ) waxey matalaan dowlada Nederlaan ee dibada. BZ waxey leedahay wakiilo (safaaradaha iyo qunsulada) oo jooga wadamo kala duwan oo dunida ah. Waxaa wakiiladaasi Nederlaan ay xubnaha reerkaaga ka caawini karaan codsigooda mideynta qoyska. Waxaa wakiilada reerkaaga ka qaadi karaan marka ballan ay qabsadaan ka dib dhacaanka DNA iyo wareysiga. Taasi waxaa mar walba la sameeyaa haddii ay IND weydiisato. Ma ogolaatay IND iney xubnaha reerkaaga helaan mvv? Markaa waxey xybnaha reerkaaga aadayaan iyagoo ballan heysta wakiilka si ay qaadashada mvv u hagaajiyaan.
www.rijksoverheid.nl

# Sharciga magangelyo ee la dabaqay: xubnaha reerka iyo sharuudaha

Sharciga la dabaqay waa sharci loogu talo galay xubnaha reerkaaga si ay adiga kula noolaadaan Nederlaan. Xubnaha reerkaaga iyo adiga waa inaad ka soo baxeysaan sharuudaha Ajaanibta.

**Xubnaha reerka ee heli kara sharciga magangelyada ee la dabaqay**
Waxaad mideynta qoyska u codsan kartaa xubnaha reerka ee hoos ku qoran:

- Xaaskaaga/ninkaaga
- Lamaanahaaga
- Ilmahaaga (koris)
- Waalidkaaga haddii aad 18 jir ka yar tahay oo keligaa ahayd marka aad magangelyada weydiisaneysey.

**Sharuudaha sharciga magangelyo ee la dabaqay**

- Waxaad go'aan ka heshay IND oo sheegaya in lagu siin doono ruqsad magangalyo oo madax banaan. Xubnaha qoyskaaga (adigoo sinaya hagitaan) waa inay codsadaan MVV 3 bilood gudahood ka dib markaad hesho go'aanka. Mudadan waxaa loo yaqaan waqtiga ka soo daba safrida.
- Xubnaha reerkaaga hore ayey markaad dibada ku noolayd ayey reerkaaga ka tirsanaayeen. Taasi waxaa lagu magacaabaa xariirka reerka. Xariirka reerka waa inuu weli jiraa haddii ay reerkaaga Nederlaan soo gelayaan.
- Xubnaha reerkaaga waa iney aqoonsigooda iyo xariirka reerka ayadiga kula leeyihiin dokumentiyo ku tusin karaan am sharixi karaan.
- Xubnaha reerkaaga laga bilaabo 12 jir waa iney marka codsiga cadeyn saxiixaan in aanay lahayn taariikh dembi. Taasi waxa lagu magacaabaa cadeynta wixii hore u jirey.
- Ilmaha laga bilaabo 15 jir iyo wixii ka weyn waa iney marka ay codsanayaan iney saxiixaan cadeynta xaalada qofka.
- Waa inaad cadeyn saxiixdaa inaad kafaale qaade ka tahay xubnaha reerkaaga.
- Waad magacowday xubnaha reerkaaga mudadii dacwada magangelyada.
- Adiga iyo lamaanahaaga labadaba waxaad tihiin 18 jir ama ka weyn.
- Ma u sameyneysaa (adoo matalaaya) ilmahaaga da'yarka ah codsi iyo waalidka kale ee dhalay uu ku haraayo dibada? Markaa waa in waalidka haraaya uu fasax siiyaa bixitaanka ilmaha aadaayo Nederlaan.

**Kama soo bixin sharuudaha sharciga magangelyada la dabaqay**
Xaaladahan soo socda kama soo baxayaan xubnaha reerkaaga iyo adiga sharuudaha:


- Adiga codsiga waqtigiisa kuma aadan sameyn. Waqtigii ka soo daba safrida ayaa la dhaafay. Waxaa IND go'aamineysaa in codsiga laga soo daahay la cafin karo;
- Waxaad rabtaa dad kale aan ahayn xubnaha reerka ee halkan lagu magacaabay iney kuu imaadaan;
- Adiga ayaa da'yar ahaan dib uga soo safray oo sharci la dabaqay ayaa lagu siiyey. Iyo adiga ayaa markaa ka dib weydiisanaaya iney waalidka kuu imaadaan.

Ma rabtaa inaad xaaladahaasi haddana aad mideynta qoyska weydiisato? Markaa waa inaad sameysaa dacwada caadiga ee deganaansho familka- ama xubnaha reerka martaa. Codsigaasi waa lacag iyo waxaa uu leeyahay sharciyo adag. Markaa isticmaal codsiga foomka 'Aanvraag voor het verblijfsdoel familie en gezin 7018 (referent)'. Tani foomkan ka heleysaa www.ind.nl/familie.

**Waxaad ahayd mudadii codsiga magangelyada keligaa oo waa ka yarayd 18 jir**
Xaaladdan oo kale, waxaad u codsan kartaa oo kaliya dib-u-midaynta qoyska (magangelyada imaatinka ka dib) waalidiinta ku dhalay. Ma waxaad rabtaa sidoo kale walalahaaga inay yimaadaan? Hadey sidaa tahay isticmaal foomka arjiga 'Codsiga oggolaanshaha deggenaanshiyaha ku meel gaarka ah - qodobka dib u midaynta qoyska 8EVRM'" (516/517). Foomkan waxaad ka heli kartaa www.ind.nl/nareis. Codsigan waa lacag.

Ma leedahay hal lamaane (guur) ka badan? Markaa waxaa keliya laguu oggol yahay hal lamaane inaad keento iyo ilmaha aad labadiina dhasheen. Sharciga Nederlaanka waxaa ku qoran in keliya hal lamaane guur la qabi karo.

## Dacwada mideynta qoyska ee dadka heysta sharciga deganaanshaha magangelyada



# Qeybta 1. Codsiga mvv dadka ka soo daba safraaya magangelyo 8 tallaabo



**Tallaabo 1:  dalabka codsiga**
Waxaad buuxineysaa ( dijitalka) foomka codsiga. Waxaad foomkan ka heli kartaa shabakada IND: www.ind.nl/nareis. Waa inaad xubin walba oo reerka ah aad foom gooni ah u isticmaashaa. Waxaa websaaytka IND waxaa ku qoran foomka Inglishka ayaad isticmaali kartaa.


Shaqaalaha VluchtelingenWerk waxey ku siinayaan warbixin ku saabsan dacwada mideynta qoyska. Waxey kaa caawin karaan buuxinta foomka codsiga mideynta qoyska. waxey kaloo kuu hagayaan mudada dacwada ka daba safrida oo dhan. Ma tahay da'yar? Intaa kadib xubin ka tirsan shaqaalaha NIDOS ayaa kugu taageeri doona codsashada.

Aqri dhamaan tilmaamaha foomka codsiga oo sidaa samey. Feejignoow inaad dhamaan dokumentiyada u dirto iyo lifaaqa wada buuxiso.

Waxaa IND ay kaa rabaan inaad xubnaha reerkaaga ey aqoonsigooda iyo xariirka reerka ay adiga kula leeyihiin dokumentiyo ku tusin karaan am sharixi karaan. Ama sharaxaad waadix ah haddii aan dokumenti jirin ama okumenti kaafi ah jirin. Waxaa loola jeedaa dokumentiyo ay soo bixiyeen dowlada wadanka aad ka soo jeedo. Xitaa cadeymo kale. Xubnaha reerkaaga waa iney badiyaa dokumentiyada asliga ah Nederlaan u soo diraan. Waxaa foomka codsiga ku qoran dokumentiyada asliga ee loo baahan yahay. Dhamaan dokumentiyada la weydiiyey waa iney Nederlaanka, Inglishka, Faransiiska ama Jarmalka ku qornaadaan ama lagu tarjumaa. Tarjumaha waa inuu ahaadaa mid maxkamada Nederlaan ay soo dhaarisey.

Aruuri sida ugu dhaqsaa badan dhamaan dokumentiyada loo baahan yahay ee codsigan. Sidaa ayaa waxaa ku suura gelineysaa howsha oo dhaqso u socota.

Waa inaad dhamaan xubnaha reerka koobi dhamaan dokumentiyadoda oo la socdo foomka codsiga u dirtaa IND. Si fiican u keydi dokumentiga asliga waayo mar dambe ayaa loo baahan karaa. Waxaad foomka codsiga oo kaamil ah, oo ay la socdaan lifaaqyada iyo sawirka wajiga u diraysaa IND. Cinwaanka IND wuxuu ku qoran yahay foomka codsiga.



**Tallaabada 2; helitaanka codsiga**

Ma heshay IND codsiga? Markaa warqad ayaad heleysaa. Halkan waxaa ku qoran magaca xubinta reerkaaga ee aad codsiga u sameysey. Iyo nambarada uu xubinta reerkaaga IND xageeda ku qoran yahay. Waxaa klaoo ku qoran taariikhda ay INA codsigaaga ay heleen iyo waqtiga IND go'aanka soo gaareyso. Waxaa IND kugu weydiineysaa warqada in dokumentiyada asliga inaad soo dirto.

Ma guureysaa? Ka hortag dib u dhac oo dacwadaada oo dhaqso ugu gudbi IND cinwaankaaga markaad bedesho. La socodsii IND iyo sidoo kale hadii qof cusub oo hagahaaga VluchtelingenWerk ay kuu sameeyaan. Isbedelada waxaad ku gudbineysaa (onlaynka) foomka- IND ama warqad ahaan.

**Tallaabada 3; baaritaanka codsiga**

Haddii codsiga laga hawl galo, IND wey kantarooleysaa codsigaaga. Waxey fiirinaayaan IND inaad dhamaan warbixinta ku buuxisay. Iyo haddii aad lifaaqyada dokumentiyada (koobiyada) aad raacisay. Codsiga ma kaamilbaa? Waxaa IND go'aamineysaa in xubnaha reerkaaga ka soo baxayaan sharuudaha sharciga magangelyada. Waxaa IND soo diidayaan codsigaaga isla markii haddii ay cadaato in xubnaha reerkaaga ay sharuudaha ka soo baxeynin. Ma ka dhiman yihiin warbixin

ama IND ma u baahan yihiin dokumenti kale oo asliga ah? Markaa dacwada wey dheeraaneysaa. Haddii ay taasi jirto warqad ayaa heleysaa.

**Tallaabada 4; buuxinta codsiga**
Warqada waxaa ku qoran warbixinta iyo dokumntiyada ay IND weli u baahan yihiin. Iyo taariikhdee lagaa rabo inada soo dirto. Waxaa kaloo ku qoran in IND ay dokumentiyada soo baari doonto.  Warqadaa ula aad si dhaqso ah qofka aad la xariirto ee VluchtelingenWerk si ay kaaga caawiyaan diritaanka dokumentoyada lagu weydiiyey. Ma u baahan tahay waqti dheeraad ah? Wac qofka IND ee codsigaaga ku hawlan ama VluchtelingenWerk ha kuu wacaan. Taleefoonka IND warqada ayey ku qoran tahay.



**Tallaabada 5: baaritaanka dokumentiyada**
Dhamaan xubnaha reerkaaga waa iney dokumenti ay ku muujiyaan waxa uu jinsiyadooda yahay. Iyo waxa uu xariirkooda yahay(xariirka reerka) ay adiga kula leeyihiin oo jooga Nederlaan. Waxaa IND baareysaa badiyaa haddii dokumentiyada ay sax yihiin. Baaritaanka dokumentiyada waxey badiyaa qaadataa dhowr wiig.

Xubnaha reerkaaga wax dokumenti ah ma heystaan? Markaa waa iney xubnaha reerkaaga iyo adiga aad si waadix ah u sharaxdaan sida ay taasi ku dhacday.




**Tallaabada 6: Baaritaanka- DNA**
Waxaa IND ay go'aamin karaan baaritaan dheeraad (sii baaritaan) iney ssameeyaan, tusaale ahaan baaritaanka dhacaanka oo loo yaqaan DNA. Ma yahay xubinta reerkaaga ilmahaaga aad dhashay ama waalidkaaga ku dhalay haddii aad da'yar tahay? Haddii xaalada sidaa tahay, markaa warqad ayaad ka heleysaa IND. Halkan waxey IND ku casumeysaa xubnaha reerkaaga baaritaanka dhacaanka loo yaqaan DNA. Sidaa ayaa xubnaha reerkaaga ku cadeyn karaan iaad adiga waalidka ama ilmaha tahay. Waxaa IND la shaqeysaa wakiilada Nederlaan (safaaradaha iyo qunsulada). Iyo marar IOM iyo ururrada qaxootiga ee Ummadaha Midoobay UNHCR. Warqada waxaa ku qoran waxa laga rabo xubnaha reerkaaga iney sameeyaan.

Marka hore waxey xubnaha reerkaaga ballan ka sameysanayaan wakiilka Nederlaan. Maalinta ballanta waxey aadayaan dhismaha safaarada. Halkaa ayaa dhaqtarka, kalkaalisada ama qof kale ka qaadayaa dhacaan afka dhexdiisa daanka xubnaha rerkaaga. Taasi waxaa looga qaadayaa geed yar oo gaar ah. Qaadista dhacaanka daanka wax xanuun ah ma laha iyo dhib uma keento caafimaadka. Waxaa dhacaanka la qaaday- DNA loo diraayaa IND Nederlaan. Xubnaha reerkaaga waa iney isla markii ay ku ogeysiiyaan haddii dhacaanka daanka  looga qaaday wakiilka Nederlaan. Waayo waa in IND adigana dhacaan kaa qaadaan. Iyo mar mar xitaa xubnaha reerka ee is dhashay Nederlaan looga qaado. Taasi waxaa laga sameeyaa ballan lagu sameeyaa xafiiska-IND. Waxaad heleysaa warqada IND oo ku qoran sharaxaada ballanta.

Waxaa IND baareysaa dhacaanka daanka ee xubnaha reerkaaga iyo kaaga. Waxaa baaritaanka dhacaanka qaadan karaa dhowr bilood. Haddii natiijada soo baxdo waxaa warbixintaasi ka heleysaa IND.

Xubnaha reerkaaga waxey aadayaa wixii baaritaan dheeraad ah wakiilka gu dhow ee Nederlaanka. Sidoo kale abaabulka bixinta mvv. Mar mar waa in xubnaha reerka arrintaasi ay ka gudbaan xaduudka wadanka. Sidaa awgeed waxaa dhici kara in ku noqoshada wadanka aad ka soo jeedo dhib noqoto. Mas'uuliyada arrintaasi waxey u taalaa xubnaha reerka. La tasho waqti hore xubnaha reerka waxa ka suura gal ah marka xaduudka laga baxo. Iyo nidaamka u degsan u safrida, joogista iyo ka safrida wadanka uu ku yaalo wakiilka Nederlaanka. Arriamahan sii abaabul ka hor intaadan ballanta ka sameynin wakiilka Nederlaanka.



**Tallaabada 7: wareysiga wakiilka Nederlaanka**

Ma suuroobeyso baaritaanka dhacaanka ama DNA ama IND ma qabtaa su'aalo? Markaa waxey IND ku casumeysaa xubnaha reerkaaga wareysi. Wareysiga waxaa lagu qabanaa wakiilka Nederlaanka ee dibadda jooga. Wareysiga waxey xubnaha reerkaaga sharaxayaan cida ay yihiin iyo waxa uu xariirkiina yahay. Waxaa IND ay adigana Nederlaan ayey su'aalo kugu weydiin karaan. Waxaa abaabulka qaadan karaa dhowr bilood.



**Tallaabada 8: go'aanka**

Waxaa IND waxey sugayaan natiijooyinka dhamaan baaritaanada la ogolaanaayo. Markaa waxaa ay baarayaan IND in xubnaha reerkaaga ka soo wada baxayaan sharuudaha. Waxaad heleysaa go'aan codsiga xubnaha reerka. Tani sida uu dhigaayo sharciga waa in muddo go'aamin seddex ilaa lix bilood ka dib marka codsiga la gudbiyo. Go'aanka wuxuu soconayaa wax ka badan marka baaritaan dheeraad loo baahan yahay.

- Go'aanka ogolaanshaha ah: Waxey xubnaha reerkaaga helaayaan mvv. Waxaa go'aanka ku qoran goorta xubnaha reerkaaga ay mvv soo qaadan karaan. Faahfaahin waxa aad u baahan tahay inaad sameyso haddii loo baahdo. IND waxay go'aanka u soo diri dontaa adiga. Adiga ayaa xubnaha reerkaaga u sheegaaya go'aanka iND. Ma loo oggol yahay xubnaha reerkaaga iney mvv soo qaataan? Markaa IND waxey go'aanka u direysaa wakiilka Nederlaan.
- Go'aanka diidmada: Xubnaha reerkaaga lama siinaayo mvv. Xubnaha reerka waxey (adigaa u qaadaaya) ka qaadan karaan racfaan go'aanka. Adiga iyo qofka aad la xariirto ee VluchtelingenWerk waxey kuu raadin karaan garyaqaan arrintan kaa caawiya.



**Tallaabada 9: qaadashada mvv go'aanka ogolaanshaha ka dib**

*Ballanta*

Xubnaha reerkaaga waa iney mvv ku soo qaataan 3 bilood gudahooda marka go'aanka oggolaanshaha. Si taasi loo abaabulo waa iney ballan ka sameystaan wakiilka Nederlaan (safaarada ama qunsulka). Taasi waa wakiilka lagu buuxiyey foomka codsiga. Ama meesha xubnaha reerkaaga ay hore baaritaan dheeraad u aadeen. Haduusan jirin wakiilka Nederlaan ee wadanka aad ka soo jeeda? Markaa xubnaha reerkaaga waa iney aadaan wadanka deriska. Waxey heystaan 3 bilood dheeraad ah si mvv loo soo qaato.

*Wakiilka Nederlaan: foomka-mvv, astaanta faraha, saxiixa iyo dhiibista baasaboorka*

Xubnaha reerkaaga waa iney sawirka dokumentiga lagu dhejiyo soo qaataan. Sawirka waa inuu ahaadaa mid ka soo baxaaya sharuudaha ku qoran www.nederlandwereldwijd.nl ama www.netherlandsworldwide.nl. si loo abaabulo mvv waxy xubnaha reerkaaga buuxinaayaan marka hore foomka bixinta-mvv. Ka dib ayaa qof ka socda wakiilka ayaa astaanta faraha ka qaadaaya xubnaha reerkaaga. Xubnaha reerkaaga wey saxiixayaan. Wakiilka Nederlaan ayaa ka qaadaaya baasaboorada

xubnaha reerkaaga. Taasi waxaa loogu baahan si loo siiyo mvv. Baasaboorka waa in muddo 6 bilood ama ka badan uu soconayaa.

Xubnaha reerkaaga wax dokumenti ah ma heystaan? Markaa badiyaa waxey helayaan mar ku dhoof (LP) Nederlaan ah. LP waa bedelka dokumentiga safarka oo hal safar keliya ah. Xubin walba oo reerka waa iney 2 sawir dheeraad ah keenaan. IND ayaa ogeysiineysa wakiilka in xubnaha reerkaaga ay LP helayaan.

> Keliya wakiilka Nederlaan ee wadanka ay ka soo jeedaan xubnaha reerkaaga banaankiisa jooga ayaa bixin kara LP.

*Sameynta mvv iyo ku dhejinta baasaboorka*
Wakiilka ayaa sameynaaya mvv. Tani waxey badiyaa qaadataa dhowr wiig. Haddii wax walba uu diyaar yahay, waxaa mvv (waxlagu dhejiyo) oo baasaboorka lagu dhejinaayo. Wakiilka ayaa ka dib casumaaya xubnaha reerkaaga iney baasaboorada soo qaataan.

*Wakiilka Nederlaan: soo qaadista mvv iyo warbixin*
Xubnaha reerkaaga waxey u noqonayaan wakiilka. Xubnaha reerkaaga waxey soo qaadanayaan baasaboorka oo mvv leh. Ama waxey qaadanayaan LP iyo mvv. Waxey helayaan qoraal warbixin oo ah waxa ay sameynayaa ka dib marka ay soo imaadaan Nederlaan.




**Tallaabada 10: Safarkaaga ilaa Nederlaan**
Haddii xubnaha reerkaaga ay soo qaateen mvv, waxey u safri karaan Nederlaan. Mar mar waxaa jira nidaam gaar ah oo xubnaha reerkaaga ee jooga dibada. VluchtelingenWerk ayaa warbixin kaa siin kara arrintaasi. Wuxuu mvv ansax yahay 90 beri. Wuxuuna mudada uu ansaxa yahay ku qoran yahay istiikarada.
Halkan waxaa ku qoran laba taariikh:

- Taariikhda uu ka bilaabanaayo (laga bilaabo taariikhda uu mvv soconaayo)
- Taariikhda uu ka bilaabanaayo (laga bilaabo taariikhda uu mvv soconaayo)

Xubnaha reerkaaga waa iskooda tigid(diyaarad) gataan oo ay Nederlaan ku soo aadayaan. IND waxey kula talineysaa in taasi la sameeyo ka dib marka mvv la soo qaato. Ma ku caawiyaan VluchtelingenWerk? Mar mar ayaa qeyb qarashka safarka ah la bixiyaa. Weydii qofka adiga aad la xariirto wixii suura gal ah. Ka hor u safrida Nederlaan waxaad xubnaha reerkaaga ballan uga sameyneysaa IND. Waxaa suura gal ah inaad isla markii aad dejin uga weydiiso COA. Qeybta 2 ayaa warbixin dheeraad ka aqrineysaa.

> Xubnaha reerkaaga waqti walba oo ay doortaan ayey codsiga dib uga soo noqon karaan. Haddii ay taasi jirto la socodsii qofka aad la xariirto VluchtelingenWerk inuu u gudbiyo IND. Xubnaha reerkaaga maka soo noqonayaan codsiga? Markaa mudada ka soo daba safrida ma amaangashana. Markaa qaabkan dib uguma weydiisan kartid mideynta qoyska.

# Qeybta 2. Dacwada magangelyada Nederlaan ee xubnaha reerkaaga oo 2 tallaabo ah



**Tallaabo 1: iska xaadirinta iyo ballanta COA iyo IND Zevenaar**
Xubnaha reerkaaga waa iney 90 beri gudahooda u soo sfaraan Nederlaan. Markay Nederlaan yimaadaan kadib, waa inay si shakhsi ahaan tagaan 3 maalmood gudahooda miiska IND ee kuyaala Zevenaar xubnaha qoyska ee gadaal ka yimaday. Iska xaadirinta Zevenaar keliya ballan ayaa lagu aadi karaa.


*Diyaarinta Hoyga COA*
Ma degan tahay xerada COA? Mise waxaad ku nooshahay guri aan ku habboonayn dhammaan xubnaha qoyskaaga inay ku noolaadaan? Kadibna COA ka codso soo dhawayn iimayl ahaan. Dejintan waa lacag la'aan. Wax su'aalo ah ma ka qabtaa tan ama ma u baahan tahay in lagaa caawiyo dirida iimaylka? Markaa caawino weydiiso qofka aad la xariirto ee VWN. Weydii meel ay degaan ka dib marka tigidka(diyaarada) loo jaray ee xubnaha reerkaaga, laakiin inta aysan Nederlaan u soo bixin.

*Weydiisashada dejinta COA e-mail ahaan*
Dejinta la weydiinaayo COA qaabkan ayaa loo sameeyaa:
1. Waxaad u direysaa COA e-mailka oo aad weydiineyso in dejin la siiyo xubnaha reerkaaga. Ku dir iimaylka ciwaanka iimaylka soo socda: FMMZZevenaarDuiven@COA.nl
2. Warbixinta soo socda ayaa e-mailka ku qoreysaa:
- Adiga magacaaga hore-iyo kan dambe, telefoonkaaga iyo e-mailkaaga(ama e-mailka VWN).
- Magaca hore iyo kan dambe ee xubnaha reerkaaga.
- Nambarka-v ee xubnaha reerkaaga.
- Taariikhda ay xubnaha reerkaaga Nederlaan imaanayaan. Taasina waa maalinta koowaad ee xubnaha reerkaaga dejin u baahan yihiin.
3. Waxaad 2 beri oo beryaha shaqada gudahooda aad heleysaa e-mail ahaan xaqiijin ka timid COA meesha ay xubnaha reerkaaga dejin ama xero ka heli karaan.

*Ballanta IND laga sameysto*
Miyaad iimayl rabitaan hoy u dirtay COA? Markaa COA ayaa ballan kuugu samayn doonta xafiiska IND ee kuyaala Zevenaar. Uma baahnid in aad ballan qabsato adiga. Ma haysaa guri ku habboon dhammaan xubnaha qoyskaaga? Haddii sidaasi tahay ballan ka qabso xafiiska IND ee ku yaala Zevenaar si aad isaga diiwaan geliso. Taasi samey ka hor inteysan xubnaha reerkaaga u soo safrin Nederlaan. Waxaad sameyneysaa ballan interneetka ah www.ind.nl/nareis-zevenaar ama www.ind.nl/en/family-member-of-refugee-zevenaar.

Cinwaanka IND ee Zevenaar waa:
Ringbaan-Zuid 2A
6905 DB Zevenaar

Zevenaar ma suura geleyso in la seexdo.



**Tallaabada 2: dacwada gaaban ee(magangelyada) iyo deganaanshaha xubnaha reerkaaga**
Waxaadacwada gaaban (magangelyada) ee xubnaha reerkaaga uu soconayaa hal beri.

Badiyaa wuxuu dacwada soconayaa hal beri. Mar mar waxaa jira shaki iyo waxyaalo aan waadix ahayn. Markaa waxey IND xubnaha reerkaaga u direysaa dacwada guud ee magangelyada. Taasi wuu ka dheer yahay.

Inta lagu jiro nidaamka xubnaha qoyskaaga, waxyaabaha soo socda ayaa dhaca:
- Shaqaalaha VWN oo sharaxaad ka bixinaaya dacwada.
- IND waxey baareysaa aqoonsiga, mvv iyo warbixinta baasaboorka ama mar ku dhoofka ee xubnaha reerkaaga.

- Xubnaha qoyskaagu waxay siiyeen sawir, saxeex iyo faraha safaarada Nederlan. Waxaa IND fiirineysaa haddii ay warbixintan sax yihiin. Mar mar ayaa IND warbixintan mar kale ay qaadayaan.
- Xubnaha reerkaaga waxey helayaan go'aanka IND. Iyo sharciga deganaanshaha haddii ay suura gal tahay. Suura gal ma ahan? Markaa waxaa xubnaha reekaaga la siinayaa warqad marka uu sharciga deganaanshaha diyaar yahay ee laga doonan karo xafiiska-IND. Sharciga deganaanshaha keliya ballan ayaa lagu soo qaadan karaa.
- Haddii loo baahdo xubnaha reerkaaga waxey ku marayaan baaritaan-tbc ama qaaxada xerada COA. Tani ma suuro gelin markaa xubnaha reerkaaga iyagaa iskooda ballan uga sameysanaaya oo baaritaan-tbc ama qaaxada Adeega Caafimaadka Degmada (GGD). Ama in baaritaan-tbc qaaxada loobaahan yahay waxey ku xiran tahay wadanka ay xubnaha reerkaaga ka imaanayaan.
- Xubnaha reerkaaga waxaa hore loo siinayaa ballan xaqiijin ah. Taasi ayey ka dib degmada iskaga qori karaan Diiwaangelinta Asaasiga ee Shaqsiga (BRP). BRP waa diiwaangelin bulshada.
- Marka uu dacwada dhamaado, xubnaha reerkaaga wey kula degi karaan. Taasi weli ma suura geleyso? Markaa waxaa xubnaha reerkaaga meel laga siinayaa xarunta COA.

## Codsi magangelyodoon oo gaar ah la weydiisto

Xubnaha reerkaaga waxey Nederlaan siineysaa sharci deganaansho laga bixiyey deganaansho shaqsi kale. Tani waa sharci deganaansho muddo ah oo ku xiran adiga sharcigaaga magangelyodoonka. Ma imaanayayaan ilmahaaga ama waalidkaaga oo mideynta reerka kugu imaanaaya Nederlaan? Markaa waa iney ugu yaraan hal sano ay adiga kula deganaadaan. IND ma kaa ceshatay codsiga magangelyada ama IND ma kuu dheereyn weydey? Markaa iND wey ceshanayaan sharciga deganaanshaha ee xubnaha reerkaaga. Iyo waxey go'aaminayaan in ay iyaga iskooda sharci deganaansho magangelyo ay heli karaan. IND sharcigooda deganaanshaha wey ka ceshan kartaa haddii uu xariirkiina reerka uu joogsado. Taasi waxey dheceysaa haddii xubnaha reekaaga aysan xariir dambe adiga kula lahayn. Ama xubnaha reerkaaga yahay ilmo sannad gudahiisa iskiisa u degaaya.

Ma rabaan xubnaha reerkaaga iney iskooda sababo magangelyo ay magangelyo u gaar ah ku weydiistaan? Markaa waxay tan ku muujin donaan waraysiga ay sinayaan xafiiska IND ee ku yaala Zevenaar. Wuxuu shaqaalaha-IND ayaa taasi faahfaahin kaa siinaaya. Haddii ay xubnaha reerkaaga codsi magangelyodoon oo u gaar ah weydiisanayaan, waxey marayaan dacwada caadiga ee magangelyodoonka taasoo muddo ka dheer soconaaya. Ma haysaa guri kugu habboon? Inta lagu jiro habaynta codsigooda magangalyada, xubnaha qoyskaag adiga ayey kula noolaan donaan. Iyaga ma heystaan xero ama guri. IND waxey soo baareysaa haddii xubnaha reerkaaga iskooda maganelyo uga baahan yihiin dowlada Nederlaan. Haddii ay taasi jirto, markaa waxaa la siinayaa sharci magangelyo u gaar ah oo muddo ah. Waxa kale oo suurtogal ah in xubnaha qoyskaagu aanay codsan magangelyo madax-banaan ilaa wakhti dambe.

## Keydinta xogta gaarka ah

Xogta shaqsiga waa dhamaan wixii warbixin ee adiga kugu saabsan. Ururada la shaqeeyey qoritaanka qoraalkan hoos ayey ku qoran yihiin. Ururadaan wey isticmaalaan xogta shaqsiga mudada codsigaaga laga shaqeynaayo, soo gudbinta ama

codsiga. Waxey ku weydiinayaan warbixintaada iyo ururada kale ama dadka kale hadii loo baahdo. Ururadaan waxey isticmaalaan iyo keydiyaan warbixintaada iyo waxey u sii gudbiyaan ururo kale haddii taasi sharci ahaan qasab tahay. Sharciga xogta shaqsiga waxaa ku qoran waajibaad saaran ururada warbixinta isticmaala. Waa iney si sax ah iyo amaan ah warbixintaada u isticmaalaan. Sharciga xogta shaqsiga waxaa kaloo ku qoran xaquuqdaada. Haddii aad weydiisato, waxaad leedahay tusaale ahaan xaquuqda soo socda:

• inaad aragto warbixintaada ururada haaya;
• ogaato waxa ay ururada ku sameynayaan warbixintaada iyo sababta;
• ogaato ururadee warbixintaada loo gudbiyey.

Ma rabtaa inaad wax dheeraad ka ogaato isticmaalka xogtaada shaqsiga iyo xaquuqdaada? Markaa fiiri websaaytyada ururadaasi.

## Su'aalaha marar badan la weydiiyo

**Codsigan ma sameyn kartaa haddii xubnaha reerkaaga aadan ogayn meesha ay joogaan?**
Haa, hubi inaad mar walba 3 bilood gudahooda codsiga sameyso. Xitaa marka aadan xariir la lahayn xubnaha reerkaaga. Haddii kale kama soo baxeysid sharuudaha ka soo daba safrida. Mar mar ayaa Laanqeyrta Cas (Rode Kruis) kaa caawin karaan. Taasi waxaa loo yaqaan baafin. VluchtelingenWerk waxey kuu diri karaan Rode Kruis.

**Ma suuragalbaa iney xubnaha reerkaaga cadeynta taariikhda dembiyada ay wakiilka Nederlaan ka saxiixaan?**
Maya, taasi suura gal ma aha. Ma dhibaato ayaa ka jira xaga diritaanka cadeynta taariikhda dembiyada ilaa Nederlaan? Kala tasho IND waxa ugu wanaagsan aad sameyn karto.

**Xaggee ayaa xubnaha reerkaaga la degeysaa haddii aad weli xero-COA aad degan tahay?**
Waxaa COA ay isku deyeysaa in adiga iyo xubnaha reerkaaga isla xero COA aad wada degtaan ilaa inta aadan guri idnku haboon jirin.

**Ma qabtaa su'aalo ka dib markaad qoraalka aqrisey?**
Su'aalahan waxaad wydiin kartaaqofka aad la xariirto ee VluchtelingenWerk.

**Ma qabtaa ashtako?**
Dhamaan ururada ku shaqada leh dacwada magangelyada, waxey u shaqeeyaan si shaqaalenimo iyo sax ah. Kuma qanacsanid qaabka uu urur ula dhaqmay xubnaha reerka? Markaa ashtako ayaa gudbin kartaa. Qofka aad la xariirto ee VluchtelingenWerk ayaa taasi kaa caawin kara.

Qoraalkan waxaa soo wada saaray:
Qeybta Boliiska Ajaanibta, Aqoonsiga iyo Ka ganacsiga Dadka (AVIM)
Nidos
Xarunta Dejinta magangelyodoonka
Centraal Orgaan opvang asielzoekers (COA)
Adeega Imigreeshanka iyo Jinsiyada (IND)
Ciidanka Ilaaliya xaduudka (KMar)
Guddiga taageerida Sharciyada (RvR)
Urur qaxootiga Caawiya Nederlaan (VWN)
Ururka Muhaajiriinta Caawiya (IOM)
Waaxda Dib u Noqoshada iyo Bixitaanka (DT&V)

Oo ay soo dalbeen:
Wasaaradda Cadaalada iyo Amaanka, maamulaha maamulka Imigrashanka
www.rijksoverheid.nl

Qoraalkan waxa ku qoran wax xaquuq ah kama soo saari kartid. Haddii tarjumaada ay dhaliso fahmid qalad ah, markaa mida Nederlaanka ayaa la raacayaa.